

**‘Cadaw lagu beegsaday Hiiraan iyo Shabellada dhexe’**

**24 Dul-Xijjah 1445H (30 Juun 2024)** – Ciidamada Mujaahidiintu waxay maanta oo Axad ah hawlgallo ka fuliyeen wilaayaatka Hiiraan iyo Shabeellada dhexe, halkaas oo lagu beegsaday maleeshiyaat murtadiin ah. Hawlgalka koowaad oo dhacay maanta barqadii, waxay ciidamada Mujaahidiintu kamiin u dhigeen maleeshiyaat murtadiin ah oo ku socdaalayay deegaan dhaca duleedka degmada Ruunirgood ee Shabeellada dhexe.

Khasaare isugu jira dhimasho iyo dhaawac ayaa cadawga lagu gaarsiiyay kamiinka, waxaana inta aan xaqiijinay cadawga laga dilay 9 murtad, kuwaas oo qaar kamid ah maydadkooda looga cararay goobta dagaalka. Dhaawaca murtadiintu waa 7 murtad. Ciidamada Mujaahidiinta ayaa sidoo kale qaniimaystay 7 qori oo boobayaal ah.

Dhanka Hiiraan, Ciidamada Mujaahidiinta ayaa galabta camaliyad istish-haadi ah la beegsaday saldhig ay ku sugnaayeen maleeshiyaat murtadiin ah, kaas oo ku yaalla galbeedka magaalada Beledweyne. Murtadiinta la beegsaday ayaa kamid ahaa haraadiga ciidamadii murtadiinta ee lagu soo dhaqan-xumeeyay wadanka Eritrea, kuwaas oo badankood ku hoobtay hawlgallada Mujaahidiinta ee 24-kii bilood ee la soo dhaafay ka dhacayey wilaayaatka bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Sidoo kale waxaa xerada ku sugnaa xubno kamid ah ciidamada ridada Jabuuti ee Hiil-gaalo.

Camaliyadda Istish-haadiga ah ayaa - Allaah fadligiis - sidii loogu talagalay u beegsatay maleeshiyada murtadiinta ah xilli ay dhoobnaayeen afaafka hore ee saldhigga. Waxaa jira khasaare dhimasho iyo dhaawac xooggan oo cadawga lagu gaarsiiyay camaliyadda. Tirada hordhaca ah ee khasaaraha cadawga waa 29 murtad oo dhimasho iyo dhaawac ku noqotay camaliyadda istish-haadiga ah, waxaa kale oo jira burbur soo gaaray saldhigii ay ku sugnaayeen iyo gaadiid ciidan oo halkaas u yaallay.



Al-Kataib

وَلِلَّهِ الْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَافِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ